

Diyaar ah markaad adigu diyaar tahay.

Metro caafimaad leh ayaa diyaar ah.



Si aan u dhawrno badqabkaaga intaad saaran tahay gaadiidkeena, waxaad isbadelo badan u samaynay raacida gaadiidka King County Metro. Fadlan akhri boggaan si aad u hesho xogta socdaalka oo cusub, waxa ay Metro samaynayso si ay u dhawrto caafimaadkaaga, iyo sida ugu habboon ee ay kuugu diyaarinayso socdaalkaaga.

Maxay tani uga dhigan tahay inaad raacdo gaadiidka King County Metro?

- Maaskarooyin ayaa qasab ah in la xirto
- Waxaa la yareeyay ama la joojiyay adeegga wadooyinka qaar
- Xadiyada dadka rakaabka ah loo sameeyay
- Kuraasta/aagaga qaar ayaa dadka laga xiray
- Aruurinta lacagta baska ayaa dib loo bilaabayaa Oktoobar: 1



https://youtu.be/_O52f_g6Oag

Adeegga bilaabanaaya Sibteembar 19, 2020

Ayadoo gobalkaagu ka jawaabaayo aafada cudurka COVID-19 dakhliguna cariri sii galaayo, Metro waxay sii wadaysaa inay:

- bixiso nidaamka socdaalka oo adkaysi iyo awood leh, iyo
- inay la socoto kana jawaabto dalabaadka sii kordhaaya ee rakaabka iyo arimaha soo badanaaya.

Laga bilaabo Sibteembar 19, 2020, isbadelkeena adeegga ee labada jeer sanadkii ayaa keenaaya isbadalo lagu samaynaayo nidaamka socdaalka. Sabab la xariirta caririyo hanka miisaanayada ah, Metro waxay yaranaysaa adeegyada meelaha qaar. Fadlan booqo [Websetkeena isbadelka adeegga](#) si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

Waxaa ku dadaalaynaa inaan muhiimada siino macaamiisheena ku tiirsan socdaalka inta badan waxaana hormarino wayn ku samayn doonaa aagaga Koonfurta King County (Degmada King). Fadlan booq [Tusmadeena Kooban ee Bilaabida Hawsha](#) si aad u hesho qaabab cusub oo ugu socdaasho aagagaan socdaalka ee la balaarshay ee deegaannada Renton, Kent, iyo Auburn. Haddii marinkaaga shaqada laga saaray, waxaad arki kartaa dookhyada socdaalka ee qorsheeyaashu ay u aqoonsadeen aagaaga.



Sound Transit

Link light rail hadda waxay shaqaynaysaa 20 daqiiqaba mar maalinta inteeda badan. Adeegyada Sounder iyo qaar kamid ah jadwalada marinada baska Sound Transit Express ayaa sidoo kale shaqo yarayn sameeyay. Rakaabka ka imaanaaya/u socda Metro waa inay sidoo kale arkaan digniinaha adeegga ee **Sound Transit ka hor inta aysan socdaalin**.



Access

Access paratransit program (Barnaamijka helitaanka socdaalka) ayaa ku shaqaynaaya jadwalada caadiga ah ayadoo lagu samaynaayo **nadiifin joogto ah** dhammaan gaariyaasha. Inta lagu jiro Jadwalada La yareeyay, Access ayay heli karaan dhammaan macaamiisha naafada ah oo aan awoodin inay u baxaan socdaalada muhiimka ah ayagoo raacaaya khadka socdaalka oo cayiman. Kuwaan waxaa ku jira macaamiisha naafada ah ee aan ka qornayn barnaamijka Access.



Community Van

- **Bothell / Woodinville / UW Bothell**
- **Duvall**
- **Sammamish**
- **Kenmore / Kirkland**
- **Lake Forest Park / Shoreline**
- **Vashon**



Tagsiga Biyaha

Marinnada Vashon iyo West Seattle ayaa hadda ku shaqaynaaya jadwalada hoos ku qoran. Shuttles 773 iyo 775 ayaa shaqaynaaya, sidoo kale.

MARINKA WEST SEATTLE

Wuxuu ka baxayaa Pier 50	Wuxuu ka baxayaa West Seattle
5:55 AM	6:15 AM
6:30 AM	6:50 AM
7:05 AM	7:25 AM
7:40 AM	8:00 AM
8:15 AM	8:35 AM
8:50 AM	9:10 AM
3:25 PM	3:45 PM
4:05 PM	4:25 PM
4:45 PM	5:05 PM
5:25 PM	5:45 PM
6:05 PM	6:25 PM
6:45 PM	7:05 PM

MARINKA VASHON ISLAND

Wuxuu ka baxayaa Pier 50	Wuxuu ka baxayaa Vashon
5:30 AM	6:10 AM
6:38 AM	7:10 AM
7:40 AM	8:15 AM
4:30 PM	4:58 PM
5:30 PM	5:58 PM
6:30 PM	6:58 PM



Gaariyaasha magaalada ee Seattle

Seattle Streetcar waxay kusii shaqayn doontaa jadwalada la yareeyay.

- **First Hill Streetcar** waxay ku shaqayn doonaan jadwalada 15-daqiiqo ee wadada hore ah Isniinta illaa Sabtida inta lagu jiro saacadaha shaqada ee la yareeyay, 5:30 subaxnimo illaa 8:30 galabnimo wax isbadelo ah kuma dhacaayaan saacadaha shaqada maalmaha Axada ah iyo maalmaha fasaxa walina waxay basasku shaqayn doonaa laga bilaabo 10 subaxnimo illaa 8 habeenimo.
- **South Lake Union Streetcar** ma shaqayn doonaan illaa ogaysiis danbe lagasoo saaro.

Wakaaladaha kale ee socdaalka

- **Community Transit**
- **Everett Transit**
- **Intercity Transit**
- **Island Transit**
- **Kitsap Transit**
- **Pierce Transit**
- **Skagit Transit**
- **Sound Transit**
- **South Lake Union Streetcar**
- **Washington State Ferries**

Hel xogtii ugu danbaysay ee socdaalka

Fariin Qoraal ah u Dir si aad u hesho Xiliyada Socdaalka

Hel waqtiyada socdaalka xigga baxaayo adeegyada socdaalka adoo fariin qoraal ugu diraaaya stop ID (aqoonsigaaga astaanka baska) lambarka 62550. Waxaad heli doontaa fariin jawaab ah oo kuu sheegaysa xiliyada xigga ee socdaaladu baxayaan ama socdaalada laga joojiyay astaankaas aad codsatay. Waxaad ka heli kartaa stop ID (aqoonsigaaga astaanka baska) qaybta saxiixa astaanka baska ama aalada Trip Planner (Socdaal Qorsheeye).

Xogta oo ku qoran Af-Ingiriis

Adeegso aalada Trip Planner (Socdaal Qorsheeye)

Gudaha aalada Trip Planner (Socdaalka Planner), dooro "Next Departures (socdaalka xigga)", kadibna gali ciwaanka goob, isgoyska, ama wado laami ah magaceed kadibna ka dooro goobta aad rabto khariirada dhexdeeda ama liiska hoos kasoo baxaaya. Natiijoyinka Trip planner ayaa ku tusinaaya waqtiyada jadwalka ku jira ama la filaayo ee bixitaanka iyo socdaalo kasta oo la joojiyay.

Xogta oo ku qoran Af-Ingiriis

Twitter

Nagala soco aalada Twitter si aad u hesho xogtii ugu danbaysay.

Xogta oo ku qoran Af-Ingiriis

Metro Matters Blog (Qoraallada Metro Matters)

khri Boostiyada aan soo dhigno oo aad ka helayso wararkii ugu danbeeyay ee Metro.

Xogta oo ku qoran Af-Ingiriis

Nagasoo wac lambarka 206-553-3000

WA Relay: 711

Tallooyinka Adeegga

Hel fariimaha gaarka u ah marinnada. Fadlan ogsoonoo in tallooyinka aysan ku jirin joojinada adeegyada heer socdaal, isbadalada, ama dib u dhacyada.

Si aad u hesho turjumaada, dooro Soomaali oo ah 'Language (luuqada)' aad ka doonayso dookhyada hoose ee Google Translate salka hoose ee bogga.

Iskaqor Transit Alerts (Fariimaha la xariira socdaalka)

Xili hore is qor si aad u hesho fariimaha ogaysiiska ah oo kuugusoo dhacaaya iimeelka, fariin qoraal ahaan, ama labadaba.

Si aad u hesho turjumaada, dooro Soomaali oo ah 'Language (luuqada)' aad ka doonayso dookhyada hoose ee Google Translate salka hoose ee bogga.

Jadwalada oo loo Kala Qaybshay Marinnada

Si aad u hesho caawimaad lagaa siiyo qorshaynta socdaalkaaga iyo xogtii ugu danbaysay ee Jadwalka La yareeyay, fadlan la xariir Xarunteena Wicitaanka oo aad ka wacayso 206-553-3000 (WA Relay 711) laga bilaabo Isniinta ilaa Jamcada, 6 Subaxnimo illaa 8 Subaxnimo.

Xogta oo Turjuman ayaa la heli karaa.

Fadlan ogsoonoo

Inta lagu jiro Jadwalka La yareeyay, qalabka qorshaynta xogta macaamiisha iyo aaladaha qoloda saddexaad ayaa qaldi kara adeegyada Metro iyo Sound Transit. Ma muujinayaan hoos u dhacyada lagu sameeyay Jadwalka La yareeyay ee Metro ama Sound Transit. Nidaamyadu waxay wali ku siin karaan xog muhiim ah, sida khariiradaha iyo xogta kastanada baska.

Sida Metro u dhawrayso badqabkaaga


Anagoo talo ka qaadana Public Health – Seattle & King County (Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha - Seattle iyo Degmada King) iyo Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarunta Kahortaga iyo Xakamaynta Cudurada), waxaan samaynaynaa wax kasta si aan u dhawrno badqabkaaga sida ugu wanaagsan ee macquulka ah, ayna ku jiraan:



Marinta daawada jeermiska gaari kasta maalin kasta



Qaab ka dhigida in maaskaro la xidho



Hawo sifeeyaasha oo la casriyeeyay



Kala fogaanshaha dadka



Gaynta basas dheeraad ah wadooyinka mashquulka badan



Kala qaybinta la xariirta badqabka

Waxaan ku dadaalaynaa inaan si joogto ah u hormarino waxaana si joogto ah u abuuraynaa una dhaqan gelinaynaa hal abuur cusub oon kor ugu qaadayno adeegga aad ka hesho gaadiidka.

COVID-19 Response and Recovery Report

Tilmaan ku socota dadka rakaabka ah


Halkaan ayaad ka helaysaa qaabka aad si tashiilan oo badqab leh ugu adeegsanayso Metro:



Xiro maaskaraati



**Joog guriga haddii
aad jiran tahay**



Ka fagoow dadka kale



**Ka dheeroow
meelaha la xiray**



**Isqaqor Transit Alerts
(Fariimaha la xariira socdaalka)**



**Ku bixi lacagta
Kaarkaaga ORCA**

Inaad guriga joogto markaad jiran tahay, inaad xili hore qroshe lahaato, kordhinta waqtiga, inaad mar kasta xirato maaskaro, aadna ka fogaato dadka kale lix fiit ayaa noo sahlaysa dhammaanteen inaan gaadiidka raacno.

Ku bixi lacagta Kaarkaaga ORCA

Mari kaarkaaga **ORCA** si aad qaab cusub oo caafimaad leh ugu bixiso qarashkaaga markaa joogto gobalka Puget Sound.

Booq bogga **“Where to buy (meesha laga iibsado)”** si aad u ogaato qaabka aad ku helayso kaarka ORCA si oonleen ah ama si toos ah. Xafiiska Metro **u qaabilsan iibinta kaarka ayaa sidoo kale furansi** loo caawiyo macaamiisha u baahan caawimaada tooska ah ee laga siinaayo kaararka ORCA iyo lacag ku shubida aaladooda E-purses. Dadka u qalma adeegga, **ORCA LIFT** ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiyo yaraynta qarashka raacida gaadiidka Metro. Carruurta iyo dadka waayeelka ah ayaa sidoo kale xaq u leh qiimo dhimis.

Waxaad ku heli kartaa Tigidhada **Transit GO** aalada moobilka.

Dadaalkeena

King County Metro waxay u taagan tahay badqabka, sinaanta, iyo ilaalinta bulshada. Mabaadii'daan ayaa hagaayay jawaab celin aan ka bixinay aafada cudurka waxayna aasaas u yihiin soo kabashadeena.

Metro waxay sii wadaysaa inay ku dadaasho xaqiijinta in qof kasta uu helaayo adeeg la heli karo, qiimo jaban diiradana saaraaya bulshooyinka baahiya ugu badan qaba. Xataa intaan waajahayno caqabadaha aafada, dakhliyada miisaaniyada oo hoos u dhacay, iyo masiibada heer qaran ee sinaanta isirada, yoolkeena aan isbadelin waa inaan dib u dhisno wakaalad socdaal oo adag oo leh amaan, sinaan, iyo dhawris ka badan intii hore.

Xogaha la xariira

- **Xog badan ka ogoow hormarinnada Metro ee “Diyaar ah markaad Diyaar tahay” ee caafimaadka iyo badqabka.** *Xogta oo ku qoran Af-Ingiriis*
- **Arag boorka halka bog ah ee sida Metro u dhawrayso badqabka socdaalka.** *Xogta oo ku qoran Af-Ingiriis*

